KEEP COVERED

Ilaasho faa'idooyinkaaga caafimaadka!

# QALABKA MACLUUMAADKA ISKAASHATADA

Macluumaadka lala wadaagayo xubnaha Oregon Health Plan (OHP) iyo dadka kale ee hela Medicaid oo ku saabsan cusboonaysiinta faa'idooyinka caafimaadka.



Oregon Health Authority
Oregon Department of Human Services
Oregon Health Plan
OregonHealthCare.gov

# Jaantuska shaxda Tusmooyinka


Guudmar loogu talogalay bahwaddagta bulshada
(macluumaadkaaga sooyaalka dartii, lalama wadaagayo xubnaha)

Macluumaad dheeraad ah oo loogu talogalay danwadaagta
(macluumaadkaaga sooyaalka dartii, lalama wadaagayo xubnaha)

- Waxay tahay inay fishaan dadka ku jira OHP ama dheefaha kale ee Medicaid
- Waxay tahay inay fishaan dadka waayaya dheefaha
- Waxay tahay inay fishaan dadka ku jira Medicare ama da'doodu gaartay 65 intii uu socday xanuunka safmareenka
- Waxay filanayaan dadka ku jira adeegyada iyo taageerooyinka muddada dheer ee loogu talogalay waayeelka iyo dadka naafada ah
- Waxay tahay inay fishaan dadka hela dheefaha cuntada

Farriimaha muhiimka ah ee xubnaha OHP iyo dadka qaata dheefaha kale

Qoraalka taleefanka
(ee loogu talogalay dadka la hadlaya xubnaha)

Waxyaalaha la qoro iimeyl ama warside

Boostiyada iyo qoraalada/sawirrada warbaahinta bulshada

Nuqulka websaytka, SMS/farriinta qoraalka ah iyo chatbot

Xogsidaha Dhacdada
(ee lagu baahinayo macluumaadka ku saabsan isqorista cid kasta u furan, saacadaha shaqada caawiyaha, iwm)

# Guudmar loogu talogalay bahwaddagta bulshada

Tan waxa ku qoran macluumaad caawinaya bahwadaagta. Looguma talogalin in lala wadaago xubnaha..

## Sooyaalka bahwadaagta

Muddadii lagu jiray xaaladda degdega ah ee caafimaadka dadweynaha ee uu keenay COVID-19, dawladda fadaraalku waxay u oggolaatay Oregon inay dheefo iyo adeegyo badan bixiso. Dadku waxay heli jireen dheefo cunto oo badan, waxayna sii haysan jireen caymiska caafimaadkooda muddadii cudurku jiray xataa haddii aysan buuxin shuruudaha caadiga ah.

## Cusboonaysiinaha Faa'idooyinka caafimaad

Xeerarkii loo dajiyay intii lagu jiray aafada cudurku waxay dhammaadeen Abriil 2023. Waxaynu u baahannahay inaynu u cusboonaysiino faa'idooyinka caafimaad cid kasta oo haysata Oregon Health Plan (OHP), Medicare Savings Programs, iyo adeegyada iyo taageerooyinka Medicaid Long Term Care ee dadka naafada ah iyo dadka da'da ah. Agabka, macluumaadka iyo khibraddani waxay macluumaad dheeraad ah kaa siin doonaan barnaamijyadan iyo sida aad uga caawin karto xubnaha inay cusboonaysiiyaan dheefahooda.

Oregon waxay ka shaqaynaysaa in dadka ugu badan ee suurtogalka ah ay noqdaan kuwa badqabkooda la ilaaliyay. Dadka intooda badan waxay sii wadan doonaan dheefahooda. Laakiin dadka qaar, dheefaha waxbaa iska beddali ama way joogsan. Waxa jira ikhtiyaaro kale oo ay heli karaan dadka u baahan dheef caafimaad. Laakiin dadkaasi waxay u baahan yihiin inay tallaabo qaadaan.

Dadka haysta OHP iyo dheefaha kale ee Medicaid waxay u baahan yihiin in cinwaankoodu uu noqdo kii u dambeeyey si aanu ula xiriiri karno si aanu cusboonaysiinta ugu sheegno.

Marka la gaaro wakhtiga ay tahay dadku inay cusboonaysiyaan, waxay heli doonaan hal ama ka badan oo waraaqood oo uu ku jiro warbixin kooban. Waraaquhu waxay u sheegi saddex shay midkood, waxayna u sheegi dadka waxa xiga oo laga rabo in ay samaynayaan:

1. Waxaan u xaqiijin doonaa in dheefahoodu sii socon doonaan. Waxa dhici karta inaysan u baahan inay noo soo jawaabaan.
2. Waxaan weydiin doonnaa inay tallaabo qaadaan si ay u cusboonaysiiyaan dheefahooda. Tani waxay noqon kartaa laba waraaqood oo kala gooni ah, mid ka hadlaysa in loo cusboonaysiiyey oo ay u baahan yihiin inay macluumaad soo diraan, iyo ta kale oo sharraxyasa macluumaadka ay tahay inay soo diraan iyo Meesha ay u dirayaan.
3. In dheefahooda isbeddal ku dhici doono ama la joojin doono una tilmaami doono ikhtiyaaraadka kale.

Waa muhiim ah in qof walba aqriyo warbixinta kooban oo ay soo sheegaan haddii wax iska badalay xaaladooda haddii wax ka mid ah macluumaadka ku qoran isbeddal ku yimid. Tusaalayaasha isbeddalada waxa ka mid ah dakhliga, cinwaanka, caymis caafimaad oo kale, iyo tirada xubnaha qoyska.

Waraaqaha diritaankooda hadda ayay bilowdeen waxayna sii socon doonaan ilaa laga gaaraayo bartamaha 2024-ta. Hay'adaha aan Danwadaagta nahay ee bulshada waxa dhici karta inay isticmaalaan Jadwalka **waqtiyaysan ee** Cusboonaysiinta caafimaadka (websayt ku qoran Ingiriisi oo muujinaaya waxa dhaca mudada lagu jiro hannaanka cusboonaysiinta) si ay u fahmaan taariikhaha muhiimka ah, hawlaha iyo hannaanada. Jadwalkan waxa loo sameeyey kaalmeeyayaal, kuwaasi oo u tababaran inay gacan ka gaystaan cusboonaysiinta. Looguma talogalin xubnaha.

## Isbeddalada dheefaha cuntada

Muddadii uu jiray xanuunka safmareenka ah ee COVID-19, dadku waxay heli jireen dheefo cunto oo dheeraad ah. Dheefahan dheeraadka ah waa joogsanayaan. Qaar ka mid ah shuruudaha helitaanka Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP) ayaa la hakiyey xilligaas, hadda dib ayaa loo bilaabi doonaa.

*Hadafkeena waa in dadka ugu badan ee suurtogalka ah ay sii wataan dheefahooga oo ay sii helaan qorshaha kaarka caafimaadka. Waanu soo dhawaynaynaa oo kugu ammaanaynaa caawintaada.*

## Danwadaagta bulshadu waxay ka ciyaaraan door muhiim ah.

Danwadaag bulsho ahaan, waxaad leedahay door muhiim ah oo aad ka ciyaarayso inaad ka caawiso dadka aad u adeegto inay sii wataan dheefahooga. **Waa kuwan waxa aad qaban karto si aad u caawiso:**

- Hubi in dadku isticmaalaan cinwaankooda, lambarka taleefan, iyo iimeylkooda u dambeeyey. Tani waxay xaqiijinaysaa inay helaan waraaqaha cusboonaysiinta iyo wixii la xiriira.
- Xasuusi inay la socdaan waraaqaha gobolka uga imaanaaya. U sheeg inay waraaqaha oo dhan isla markaaba akhriyaan, oo ay sameeyaan waxa loo sheego Waraaqaha diritaankooda hadda ayay bilowdeen waxayna sii socon doonaan ilaa laga gaaraayo bartamaha 2024.
- U sheeg xubnaha siyaabaha ay ku helli karaan caawinaad, Sidii ay ku cusboonaysiin lahaayeen, ama ku soo sheegi lahaayeen isbeddalka:
    - Onlayn halkan **benefits.oregon.gov**
    - Wacaan (833) 722-9156 maalmaha shaqada laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo Dhammaan wicitaanada dadka naafada ah waa la aqbalayaa. Ka raadi lambarrada taleefanada ee caawimada luuqaddaada ku baxaysa halkan **benefits.oregon.gov**. Waxa fiican in gallinka hore ay ee aroorta hore na soo wacaan.
    - Waxaad raadisaa xafiis deegaan ama kuwa aan danwadaagta bulsho nahay bartan ciwaankeedu yahay **KeepCovered.Oregon.gov**
        - Danwadaagtu waxay isticmaali karaan linkiyadan tooska ah si ay caawimo deegaanka ah u helaan:
            - Xafiiska deegaanka: **oregon.gov/dhs/offices/pages/one-services.aspx**
            - Kuwa ka caawiya bulshada araajida: **oregonhealthcare.gov/gethelp**
- Ka caawi dadka inay sameeyaan waxa waraaqaha loogu sheegayo. Tan waxa ka mid noqon kara bixinta macluumaad, buuxinta foomka cusboonaysiinta, ama u dhigista balanta waraysiga uu la yeelanaayo shaqaalaha.

- Xasuusi cid kasta inay akhrido warbixinta kooban oo ay ka warbixiso isbeddalada haddii wax ka mid ah macluumaadka ku qoran isbeddalay. Tusaalayaasha isbeddalada waxa ka mid ah dakhliga, cinwaanka, caymis caafimaad oo kale, iyo tirada xubnaha qoyska.
- Ku xir dadka khayraadyo kale sida Oregon Health Insurance Marketplace ama barnaamijyada cuntada ee bulshadaada (oo laga heli karo **found at needfood.oregon.gov**) haddii dheefahoodu joogsanayaan ama yaraanayaan.

### Heegan ayaanu u nahay inaan ku caawino!

Booqo barta ciwaankeedu yahay **KeepCoveredPartners.Oregon.gov** si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah. Waxaad ka heli doontaa agab aad soo dejisato oo aad isticmaasho, qaabab aad ku dalbato agab daabacan, webinaaro loogu talogalay danwadaagta iyo Su'aalaha Badanka la Iswaydiiyo. Sidoo kale waxaad isku **diiwaangalin kartaa warsidaha danwadaagta ee Keep Covered**

Sidoo kale waxaanu isticmaalaynaa xayeysiiska dhejitaalka, boorar, iyo jaraa'idada deegaanka iyo xayeysiiska raadiyaha si aanu u gaarno xubnaha.

Waxaanu rabnaa inaanu ogaano ra'yigaaga, si aan uga jawaabno codsiyadeena, oo ka jawaabno su'aalahaaga si aanu markaa sida ugu fiican ugu taageeri karno xubnaha OHP iyo dadka hela dheefaha kale ee Medicaid. Waxaad ku soo diri kartaa ra'yigaaga **feedback@odhsoha.oregon.gov**.

## Macluumaad dheeraad ah oo loogu talogalay danwadaagta

### Waxay tahay inay fishaan dadka ku jira OHP ama dheefaha kale ee Medicaid

Oregon waxay dib u eegaysaa u qalmitaanka inta u dhaxaysa Abriil 2023 iyo bartamaha 2024.

- Dadku dheefahooda way sii haysan doonaan ilaa ay ka cusboonaysiinayaan.
- Dadka intooda badan waxay sii qalmi doonaan  dheefahooda caafimaad.
  - Dadka qaar ma u qalmi doonaan waxayna u baahan doonaan caawimo si ay u dalbadaan caymis caafimaad oo kale.
  - Dadka qaar ku jira Medicare waxa dhici karta inay u wareegaan Medicare Savings Program oo dheefahiisa ay ka yar yihiin.
  - Dadka qaar waxa dhici doonta in si kumeel gaar ah loogu kordhiyo dheefaha ilaa Juun 2024.
  - Cid walba isku mar ma heli doonaan warqaaqahooga. Kaalmeeyayaasha ayaa laga yaabaa inay awoodaan inay qiyaasaan marka qofku ay tahay inuu cusboonaysiiyo. Haddii aadan haysan kaalmeeye, waxaad mid ka heli kartaa barta oregonhealthcare.gov/gethelp.

Dadka haysta OHP ama dheefaha kale ee Medicaid waxay ku heli doonaan waraaqaha cusboonaysiinta iyo guudmarka kiiska boostada iyagoo ka helaya gobolka Oregon inta u dhaxaysa Abriil 2023 ilaa bartamaha 2024. **Waxa muhiim ah in dadku isticmaalaan cinwaankooda, lambarka taleefanka iyo cinwaanka iimeylkooda ugu dambeeyay si ay markaa u helaan**

**waraaqahan muhiimka ah.** Qaybta Sare ka fiiri qaababka ay iyagu iskood ugu samayn karaan sidan ama ha raadsadaan caawimo bilaash ah si ay u cusboonaysiiyaan macluumaadkooda.

- Waraaquhu waxay dadka u sheegi doonaan tallaabooyinka xiga ee ay u baahan yihiin inay qaadaan.
  - Dadka qaar lagama rabo inay tallaabo qaadaan, waraaqdooda ayaana sidaas u sheegi doonta.
  - Dadka qaar waxay u baahan doonaan inay bixiyaan macluumaad dheeraad ah.
  - Dadka qaar waxay u baahan doonaan inay buuxiyaan dalabka dib u cusboonaysiinta.
  - Dadka qaar dheefahoogu waa joogsan doonaan, waxayna u baahan doonaan inay iska diiwaangaliyaan caymis kale.
- Dhammaan xubnaha waa inay sidoo kale akhriyaan warbixinta kooban oo ay ka warbixiyaan haddii waxa warbixinta ku qoran wax iska badalay wax ka mid ah macluumaadka ku qoran isbeddalay. Tusaalayaasha isbeddalada waxa ka mid ah dakhliga, cinwaanka, caymis caafimaad oo kale, iyo tirada xubnaha qoyska.
- Dadka hela dheefuhu waxay heli karaan caawimo bilaash ah si ay u raacaan tilmaamaha ku yaala waraaqaha, iyagoo isticmaalaya khayraadka kor ku xusan.

## Waxay tahay inay fishaan dadka waayaya dheefaha

Cid kasta waxay heli doontaa ogeysiis ugu yaraan 60 maalmood kahor inta aan laga joojin ama isbadal lagu samayn dheefahooda.

- Xataa haddii dadku aysan u qalmin OHP ama dheefo kale ee Medicaid oo gobolku bixiyo, waxa jira ikhtiyaaro kale. Waxa muhiim ah inay ka jawaabaan waraaqahooga si markaa gobolku uga caawin karo inay helaan caymin.
- Dadku waa inay akhriyaan warbixinta kooban ee waraaqdooda. Haddii wax ka mid ah macluumaadku qaldan yihiin, waa inay kala xiriiraan xarunta adeegga macmiilka ONE 800-699-9075 si ay u cusboonaysiiyaan macluumaadkooda kahor intayna dheefahoodu joogsan. (Dhammaan wicitaanada dadka naafada ah waa la aqbalayaa. Kaga raadi caawimo luuqaddaada ku baxaysa halkan benefits.oregon.gov.)
- Haddii warbixinta kooban macluumaadkiisu saxsan yahay laakiin qofku u malaynayo inuu wali u qalmo, u sheeg gobolka inuu dib u eego go'aanka. Si aad sidan u samayso, codso dhagaysi. Macluumaadku halkan ayaad ka heli kartaa: oregon.gov/oha/HSD/OHP/Pages/Appeals-Hearings.aspx
- Dadka qaar waxa dhici karta inay waayaan lacagaha ay siiso Medicaid ee adeegyada iyo taageerooyinka muddada dheer oo ay ka helaan Oregon Department of Human Services. Xubnaha ka walaacsan adeegyadooda daryeelka muddada dheer waa inay la hadlaan maamulaha kiiskooda.

Dadku waxay haystaan ikhtiyaaro kale marka la eego cayminta caafimaadka:

- **Waxaa laga yaabaa inay dadku u-qalmaan Medicare.** Ka wac Social Security Administration lambarka 800-772-1213 si aad isaga diiwaangeliso telefoonka ama aad ballan uga qabsato xafiiska deegaanka maxalliga. Dadku sidoo kale waxay iskaga diiwaangelin karaan Medicare

onlayn ahaan halkan ssa.gov/medicare/sign-up. Ama waxay booqan karaan halkan OregonHealthCare.gov/GetHelp si ay u helaan wakiil caymiska Medicare ama qof ku sugan Senior Health Insurance Benefits Assistance Program (SHIBA). Ama waxay ka wici karaan SHIBA  800-722-4134.

- **Dadka aan u qalmin Medicare waa inay hubiyaan si ay u ogaadaan haddii loo-shaqeeyahooga ama loo-shaqeeyaha xubin qoyskiisa ah uu bixiyo caymis raqiis ah.** Dadku waa inay la hadlaan maamulahooga ama waaxda shaqaalaha kahor inta aysan joogsan OHP-goodu. Waxay heli doonaan waqti isdiiwaangelin oo gaar ah markay waayaan OHP.
- **Dadka aan haysan Medicare ama qorshe loo-shaqeeye oo la awoodi karo waxaa laga yaabaa inay ka iibsan karaan qorshe caafimaad Oregon Health Insurance Marketplace.** Kaasoo qiimihiisu noqon karo ugu yaraan $1 oo kaliya bishii. Qorshayaashu waxay daboolayaan waxyaabaha ay ka midka yihiin daawooyinka dhakhtarku qoro, booqashooyinka dhakhtarka, daryeelka degdegga ah, isbitaal dhigista iyo wax kale oo badan.
- **Dadka waaya OHP waxay iska diiwaangalin karaan caymiska Suuqa isla marka la gaaro taariikhda joojinta OHP.** Dadku waxay is diiwaangalin karaan kahor inta OHP-goodu uusan joogsan si ay uga fogaadaan kala-go' ku dhaca caymiskooda, laakiin waxay haystaan ilaa Julaay 31, 2024 inay isdiiwaangaliyaan.
    - Si aad wax badan u ogaato, booqo hlkan OregonHealthCare.gov ama wac 833-699-6850 (lambarka si lacag la'aan ah loo waco, wicitaannada dadka naafada ah waa la aqbalayaa).
    - Waxay sidoo kale u booqan karaan danwadaagta bulshada ama wakiilka caymiska si ay uga helaan caawimo bilaash ah oo fool ka fool ah ama taleefanka ah. Si aad u hesho midka kuugu dhow, fadlan booqo OregonHealthCare.gov/GetHelp.

## Waxay tahay inay fishaan dadka ku jira Medicare ama da'doodu gaartay 65 intii uu socday xanuunka safmareenka

Medicare waa caymis loogu talogalay dadka da'doodu tahay 65 iyo ka wayn ama dadka naafada ah. Dadku waxay heli karaan OHP ama dheefaha kale ee Medicaid iyo sidoo kale Medicare.

- Dadka qaar iyagoo haysta OHP kadibna waxay bilaabeen Medicare muddadii xanuunka safmarka ah uu socday. Waxayna sii haysteen OHP muddadii safmareenka oo dhan. Waxaynu ugu yeernaa tan dheefaha "laba-laaban ee buuxa" sababtoo ah waxay lahaayeen caymiska Medicare iyo sidoo kale caymiska OHP oo "dhamaystiran".
- Dadku sidoo kale waxa dhici karta inay u qalmaan Medicare Savings Programs oo ka caawinaysa iska bixinta kharashka Medicare.

Cid kasta waxay u baahan tahay inay cusboonaysiiso. Dad badan waxay u baahan doonaan inay waraystaan shaqaale si ay u go'aamiyaan nooca dheefaha laga yaabo inay u qalmaan.

- Waxa dhici karta inay caawimo helaan iska bixinta kharashka Medicare Part B, inay helaan caymin labaad, iyo inay helaan caymin laba-laaban oo buuxda oo sii socota oo ay ku jiraan ilkaha iyo gaadiidka xaaladda aan degdega ahayn
- Haddii aad caawimo ugu baahan tahay hawlaha maalinlaha ah ee guriga ama xarunta, wax ka waydii adeegyada iyo taageerooyinka daryeelka muddada dheer.

Dadka laga joojiyo dheefaha OHP ee buuxa waxay booqan karaan OregonHealthcare.gov/GetHelp. Halkaasi waxay ka heli karaan wakiil caymis ama caawiye ku sugan Senior Health Insurance Benefits Assistance Program (SHIBA). Ama waxay ka wici karaan SHIBA 800-722-4134. Dadkani waxay ka caawin karaan doorashada Medicare-ta saxda ah.

Dadka u baahan inay iska diiwaangaliyaan Medicare waxay kala xiriiri karaan Social Security Administration 800-772-1213 si ay taleefanka iskaga diiwaangaliyaan ama u helaan xafiis deegaanka ah. Waxay isku diiwaangelin karaan sidoo kale Medicare iyagoo adeegsanaya barta onlaynka ah ee ciwaankeedu yahay ssa.gov/medicare/sign-up.

- Waxa muhiim ah in dadku isku diiwaangaliyaan caymiska Medicare muddada isdiiwaangalintooda bilawga ah. Arrintani waxay soconaysaa toddoba bilood, oo ka bilaabmaysa saddex bilood kahor intaysan gaarin 65 jir. Sidoo kale waxay isku diiwaangalin karaan 6 bilood gudahood joojinta OHP-gooda.
    - Haddii qofka ay ka hoos baxdo is diiwaangalinta Medicare markuu gaaro 65 jir, hadda waa inay isdiiwaangaliso. Haddii cidi isdiiwaangalin waydo markay gaarto 65 jir ama 6 bilood gudahood joojinta OHP, waxa dhici karta in laga rabo bixinta lacag dheeraad ah, oo loogu yeero ganaaxa isdiiwaangalinta daahitaanka ah.
- Haddii aad haysato caymis kale sida midka loo-shaqeeyaha laga helo, waxa dhici karta inaan laga rabin bixinta ganaax. Fadlan ka hubi Medicare si aad u xaqiijiso.
- Haddii ay u qalmaan Medicare Savings Program, ma aha inay bixiyaan lacagta ganaaxa.
- Wax badan ka ogow halkan medicare.gov/basics/costs/medicare-costs/avoid-penalties.

## Waxay filanayaan dadka ku jira adeegyada iyo taageerooyinka muddada dheer ee loogu talogalay waayeelka iyo dadka naafada ah

Daryeelka muddada dheer ee Medicaid waxa ka mid ah adeegyada caawiya dadka qaba naafada jireed, maskaxeed, iyo garasho ama koboceed. Adeegyadu waxay ka caawiyaan baahiyaha daryeelka caafimaadka ama shakhsiyeed ee maalin kasta ee iyagu iskood aysan u samayn karin.

- Dadku waxay adeegyada ku heli karaan guriga ama bulshada dhexdeeda, ama xarumaha daryeelka, sida daryeelka xannaanada dadka waawayn, noolaanshaha la kaalmeeyo iyo xarumaha la dego, xarumaha xannaanynta, iyo bulshooyinka daryeelka xasuusta.

Dadka hela adeegyada daryeelka muddada dheer ee Medicaid waxay u baahan doonaan inay cusboonaysiiyaan faa'idooyinkooda OHP iyo adeegyada daryeelka muddada dheer. **Xubnuhu waxay u baahan yihiin inay isticmaalaan macluumaadkooda xiriirka ee u dambeeyey si aanu ula soo xiriiri karno.** Waa inay boosta ka fishaan waraaqdooda cusboonaysiinta.

- Xubnuhu waxay u xilsaari karaan "Wakiil Idman" sida saaxiib ay ku kalsoon yihiin ama xubin qoyska ah si ay uga caawiyaan hannaanka cusboonaysiinta. Haddii xubintu samaysato wakiil idman, wakiilka idman waxa waajib ah inuu macluumaadka xiriirka  ugu dambeeyey isticmaalo sidoo kale.
    - Foomka wakiilka idman oo Ingiriisi ah: **sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/me0231.pdf**
    - Foomka wakiilka idman oo Isbaanish ah: **sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/ms0231.pdf**

- Dadka hela daryeelka muddada dheer waxay leeyihiin maamule kiis. Markay caawimo u baahdaan waxay la xiriiraan maamulaha kiiskooda.
- Cusboonaysiinta kadib, xubnuhu waxay la kulmaan mid ka mid ah kuwa soo socda:
    - Haddii ay u qalmaan wali, waxa dhici karta in isbeddalo ku dhacaan adeegyada daryeelka muddada dheer, laakiin OHP-goodu uu sii socon doono.
    - Haddii aysan u qalmin OHP dakhliga dartii, dheefahooda caafimaadka OHP iyo adeegyada daryeelka muddada dheer waa joogsan doonaan.
- Haddii dheefaha cidi yaraanayaan ama joogsanayaan, waxay codsan kartaa ciddaasi dhagaysi haddii aysan ku raacsanayn ama ay u malaynayso in gobolku qaldamay. Macluumaadka halkan ayaad ka helli kartaa: **oregon.gov/oha/HSD/OHP/Pages/Appeals-Hearings.aspx**
- Isbeddalada ku dhaca OHP-ga ama adeegyada daryeelka muddada dheer ee qof waxay saamayn karaan guryeyntiisa. Dadka deggan xarunta daryeelka muddada dheer  ama guriga xannaanada dadka waawayn, ama leh daryeelayaal guriga ugu adeega, waa inay kala hadlaan maamulaha kiiskooda qaababka ay u sii wadan karaan adeegyada ay u baahan yihiin.

## Waxay tahay inay fishaan dadka hela dheefaha cuntada

Muddadii lagu jiray Xaaladda Caafimaadka dadweynaha ee degdega ee uu keenay Covid-19 dadka qaar waxa la siinayey dheef cunto oo saa'id ah. Barnaamijyadan cuntada ee xaaladda degdeg ah waa la joojiyey:

- **Qoondaymaha Xaaladda degdega ah ee SNAP**: Dadku waxay heli jireen Qoondaymaha Xaaladda Degdeg ah ee SNAP bil kasta laga bilaabo Abriil 2020 – Febraayo 2023. Kuwani waxay joogsadeen Maarso 2023. *Macluumaadkaas halkan ayaad ka heli kartaa:* ***oregon.gov/dhs/ASSISTANCE/FOOD-BENEFITS/Pages/Emergency-Allotments.aspx***
- **EBT-ga Safmareenka iyo P-EBT-ga Xagaaga**: Dheefahan cuntada waxa loogu talogalay carruurta si loo hubiyo inay heleen cunto tayo leh muddadii COVID-19ka uu jiray. Tan ugu dambaysa ee dheefahan waxay joogsan doontaa Maajo 31, 2023. *Macluumaadku halkan buu ku jiraa:* ***oregon.gov/dhs/ASSISTANCE/FOOD-BENEFITS/Pages/P-EBT.aspx***

Shuruudaha u qalmida SNAP qaarkood ayaa la hakiyey xilli lagu jiray Xaaladda degdega ah ee Caafimaadka Dadweynaha ee uu keenay COVID-19. Siyaasadahani haddana waa isbeddali doonaan:

- **Xaddidaadaha wakhtiga ee SNAP:** Shuruudaha shaqada ayaa mar labaad bilaabmaya marka la eego kaqaybqaatayaasha SNAP ee Jir Ahaan Fayow oo aysan jirin Cid ku Tiirsan laga bilaabo **Julaay 1, 2023**. Dadku waxa waajib ah inay buuxiyaan shuruudaha shaqada—ama helaan ka dhaafitaan–-si ay u helaan in ka badan saddex bilood SNAP muddo saddex sano ah. Meelaha qaar iyo Dhulalka Qabiiladu deganyihiin loogama baahna shuruudaha shaqada. *Macluumaadkeeda halkan ayaad ke heli kartaa*: ***oregon.gov/dhs/ASSISTANCE/FOOD-BENEFITS/Pages/snap-time-limits.aspx***
- **Ka dhaafitaanka kumeel gaarka ah ee SNAP ee ardayda waxbarashada sare ku jirta:** Xeerarka ka caawiyey arday badan inay u qalmaan dheefaha cuntada waa joogsanayaan.
    - **Kiisaska cusub** waxa dhici karta inay isticmaalaan xeerarka kumeel gaarka ah ilaa Juun 10, 2023. **Kiisaska joogtaada ah** waxa dhici karta inay isticmaalaan ilaa Juun 30-keeda.

- Kadib Julaay 1, 2023, kiisaska joogtada ah waxay sii ahaan qaar la daboolo oo ay caymiyeen xeerarka kumeel gaarka ah ilaa laga gaaraayo waqtiga cusboonaysiinta.

Fadlan u sheeg dadka inay booqdaan needfood.oregon.gov iyo alimentos.oregon.gov si ay uga helaan khayraad cuntada ee bulshadooda. Websaytyadani waxay leeyihiin xogsidayaal iyo kaararka warbaahinta bulshada oo danwadaagtu wadaagi karaan. Sidoo kale waxay leeyihiin agab, khayraad iyo khibrad isgaarsiin ee khayraad ku qoran luuqado badan.

*Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriisi, OHA waxay bixin kartaa macluumaad u qoran qaabab kale sida tarjumaado, daabicidda farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir lambarka 503-945-5488 (wicitaanada dadka naafada ah waa la aqbalaa) ama feedback@odhsoha.oregon.gov.*

# Farriimaha muhiimka ah ee xubnaha OHP iyo dadka qaata dheefaha kale

## Fadlan la wadaag macluumaadkan xubnaha OHP iyo dadka qaata dheefaha Medicaid ee kale si ay uga caawiyaan sii wadashada dheefahooda:

- **Cusboonaysiinta Oregon Health Plan (OHP) ayaa mar kale bilaabatay iyo dheefaha kale ee Medicaid. Oregon waxay ka shaqaynaysaa inay dadka ugu badan ee suurtogalka ah ay noqdaan kuwa haysta dheef caafimaad. Dadka intooda badan waxay sii wadan doonaan dheefahooda. Waxa jira ikhtiyaaro sidoo kale oo ay heli karaan dadka u baahan dheefo caafimaad. Laakiin waxaad u baahan tahay inaad tallaabo qaaddo.**
- Ma leedahay OHP ama dheefo kale ee Medicaid, sida Medicare Savings Program ama adeegyada iyo taageerooyinka loogu talogalay dadka da'da ah iyo dadka naafada ah? **Hubi in gobolka Oregon hayo cinwaanka ugu dambeeyay. Oo marka aad waraaqo ka hesho gobolka Oregon si aad u cusboonaysiiso caymiskaaga, samee waxay kaa rabaan isla markii ay ku soo gaarto warqadda.**

## Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsn sida arrintan loo sameeyo:

- Shayga ugu muhiimsan oo ay tahay inaad samayso waa inaad hubiso in **cinwaankaagu sax yahay si markaa gobolka Oregon uu waraaqda cusboonaysiinta boostada kuugu soo diro.**
  - *(Ku socota danwadaagta: Haddii aad tahay kaalmeeye muctarif ah oo ka caawiya isdiiwaangalinta OHP iyo Medicaid, ka caawi inay isticmaalaan cinwaanka ugu dambeeyey)*
  - Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo cusboonaysiiyo cinwaanka loona helo danwadaag xafiis ama bulsho oo kuu dhaw halkan KeepCovered.Oregon.gov.
    - Websaytkani waxa ku qoran dhammaan macluumaadka, lambarada taleefanada iyo linkiyada aad u baahan tahay.
  - Waxaad sidoo kale kaga soo warbixin kartaa isbeddalada kagana jawaabi kartaa cusboonaysiinaha onlayn bartan benefits.Oregon.gov.

- Ama, waxaad wici kartaa (833) 722-9156 maalmaha shaqada laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo. Dhammaan wicitaanada dadka naafada ah waa la aqbalayaa. Waxaad caawimo ku heli kartaa luuqado badan — kaga hel caawimo luuqaddaada ku baxaysa halkan [benefits.Oregon.gov](benefits.Oregon.gov). (Wicitaanada Ingriisida ah, wakhtiyada sugitaanku waa kuwa ugu gaaban inta u dhaxaysa saacadaha 7 subaxnimo iyo 8 subaxnimo.)

- **Inta badan la soco boostadaada** waraaqaha ay kuusoo diraan gobolka Oregon. Waraaquhu waxay soconayaan muddada u dhaxaysa hadda iyo bartamaha 2024. Cid walba isku mar ma heli doono warqaaqaha. Had iyo jeer hubi boostaada ilaa aad hesho waraaqahaaga.
- Markay kusoo gaaraan waraaqaha, **isla markiiba samee waxyaabaha ku qoran.** Tani waxay kaa caawinaysaa inaadan ku dhicin kala-ga' ku yimaad dheefahaaga. Waxaad heli kartaa caawimo bilaash ah si aad u fahamto waraaqahaaga oo aad samayso waxay kuu sheegayaan. Booqo [KeepCovered.Oregon.gov](KeepCovered.Oregon.gov) ama wac (833) 722-9156 si aad u ogaato meesha aad ka heli karto caawimo.
  - *(Ku socota danwadaagta: Haddii aad tahay kaalmeeye muctarif ah oo caawiya isdiiwaangalinta OHP iyo Medicaid, ka caawi inay akhriyaan oo ka jawaabaan waraaqahooga)*

## Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan waraaqaha iyo waxa xigi doona:

Waxaad heli doontaa waraaqo cusboonaysiin iyo warbixin kooban, kuwaasoo sharraxaya dheefaha. Si taxaddar leh u akhri warbixinta kooban ee xubin kasta oo qoyskaaga ka mid ah.

Waraaqahaagu waxay kuu sheegi karaan waxyaabo ay ka mid yihiin:

- Waxa laguu cusboonaysiiyey OHP iyo dheefaha kale ee Medicaid. Dib-u-eeg macluumaadka si aad u hubiso in wax walba ay sax yihiin. Noosoo sheeg haddii ay wax isbeddeleen.
- Waa inaad bixiso macluumaad dheeraad ah si aad u ogaato inaad weli dheefaha u-qalanto. Waxaa laga yaabaa in laguu sheego inaad soo dirto macluumaad ama wareysi lagula yeesho. Waxaad heli kartaa wax ka badan hal waraaq. Waxaad haystaa ilaa 90 maalmood si aad jawaab u bixiso. Waraaqdu waxay kuu sharrixi doontaa waxyaabaha ay tahay inaad samayso.
- Dheefaha qorshaha OHP ama dheefaha kale ee Medicaid waxaa ku yimid isbeddal, ama hadda uma qalantid. Haddii ay tani dhacdo, waxaad heli doontaa ogeysiis 60 maalmood ah kahor inta aysan dheefahaagu kaa joogsan. Waxaan kuusoo diri doonaa macluumaad ku saabsan xulashooyinka kale ee caymiska caafimaadka.

**Haddii adiga ama xubin qoyska ah aysan u qalmin OHP,** waxaad heli doontaa ogeysiis 60 maalmood ah kahor inta aysan dheefahaagu joogsan. Haddii tani ay dhacdo, waxa jira ikhtiyaaro kale.

- **Waxaa laga yaabaa inaad u-qalanto Medicare.** Ka wac Social Security Administration lambarka 800-772-1213 si aad isaga diiwaangeliso telefoonka ama aad ballan uga qabsato xafiiska deegaanka maxalliga. Waxaad isku diiwaangelin kartaa Medicare adigoo adeegsanaya barta onlaynka ah ee ciwaankeedu yahay [ssa.gov/medicare/sign-up](ssa.gov/medicare/sign-up). Ama waxaad booqan kartaa [OregonHealthcare.gov/GetHelp](OregonHealthcare.gov/GetHelp) si aad u hesho wakiil caymis ama qof kaa caawiya barnaamijka Senior Health Insurance Benefits Assistance Program (SHIBA). Ama waxay ka wici karaan SHIBA 800-722-44134.

- **Haddii aadan u-qalmin Medicare, hubi si aad u ogaato in loo-shaqeeyahaagu bixiyo qorshe la awoodi karo.** Hubso inaad la hadasho maamulahaaga ama waaxda shaqaalaha ka hor inta uusan kaa dhammaan qorshahaaga OHP. Waxaad heli doontaa waqti isdiiwaangelin oo gaar ah marka aad lumiso OHP-ga.
- Haddii aadan haysan Medicare ama qorshe loo-shaqeeye oo la awoodi karo, **waxaa laga yaabaa inaad ka iibsan karto qorshe caafimaad *Oregon Health Insurance Marketplace*** adigoo bixinaya lacag yar oo dhan $1 bishii.
- Dadka waaya OHP waxay iska diiwaangalin karaan caymiska Suuqa isla marka la gaaro taariikhda joojinta OHP. Dadku waxay is diiwaangalin karaan kahor inta OHP-goodu uusan joogsan si ay uga fogaadaan kala-go' ku dhaca caymiskooda, laakiin waxay haystaan ilaa Julaay 31, 2024 inay isdiiwaangaliyaan.
- Qorshayaashu waxay daboolayaan waxyaabaha ay ka midka yihiin daawooyinka dhakhtarku qoro, booqashooyinka dhakhtarka, daryeelka degdegga ah, isbitaal dhigista iyo wax kale oo badan. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo barta ciwaankeedu yahay OregonHealthCare.gov ama wac 1-833-699-6850 (lambarka si lacag la'aan ah loo waco, wicitaannada dadka naafada ah oo dhan waa la aqbalaa). Waxaad sidoo kale u booqan kartaa danwadaagta bulshada ama wakiilka caymiska si aad uga hesho caawimo bilaash ah oo fool ka fool ah ama taleefanka ah. Si aad u hesho midka kuugu dhow, fadlan booqo OregonHealthCare.gov/GetHelp.
    - *(Ku socda Danwadaagta: Haddii aad tahay kaalmeeye, inaad caawiso u bandhig marxaladdan)*

# Qoraalka taleefanka

*Ma haysataa shaqaale qabta wicitaanada ku saabsan Oregon Health Plan (OHP) ama dheefaha kale ee Medicaid? Isticmaal qoraalkan si aad uga taageerto dadka hannaanka cusboonaysiinta.*

Cusboonaysiinta Oregon Health Plan (OHP) ayaa dib u bilaabmay iyo dheefaha kale ee Medicaid. Oregon waxay ka shaqaynaysaa inay dadka ugu badan ee suurtogalka ah ay noqdaan qaar haysta kaar caafimaad. Dadka intooda badan waxay sii wadan doonaan dheefahooda. Waxa jira ikhtiyaaro kale oo ay heli karaan dadka u baahan dheefo caafimaad. Laakiin waxaad u baahan tahay inaad tallaabo qaaddo.

Ma Haysataa OHP ama dheefaha kale ee Medicaid, sida Medicare Savings Program? Adeegyada iyo taageerooyinka, sida ka caawinta hawlaha guriga ama xarunta, ee dadka naafada ah iyo dadka da'da ah?

***(Hadday haa tahay)*:** Hubi in gobolka Oregon hayo cinwaanka ugu dambeeyay. Iyo marka aad waraaqaha cusboonaysiinta ka hesho gobolka Oregon, samee waxay kaa rabaan isla markaaba.

## Ma jeclaan lahayd inaad wax badan ogaato?

1. **Miyuu cinwaankaaga boosto, lambarka taleefanka ama cinwaankaaga iimeylku isbeddalay ilaa Abriil 2020?** Hadday haa tahay, waxaan kuu sheegi karaa sida loo cusboonaysiiyo macluumaadkaaga xiriirka. Ma jeclaan lahayd inaad wax badan ogaato? *(Hadday haa tahay, ka fiiri "dadka raba in laga caawiyo cusboonaysiinta macluumaadkooda xiriirka," hoos. ka eeg qaybta hoose).*

2. **Inta badan boostadaada ka hubi waraaqaha ay kuusoo diraan gobolka Oregon.** Waraaqahaaga cusbooneysiinta iyo warbixinta kooban waxay kuu sheegi doonaan waxyaabaha ay tahay inaad samayso. Waraaqaha diritaankooda hadda waa socdaan ilaa laga gaarayo bartamaha sannadka 2024. Cid walba isku mar ma heli doono warqaaqaha, markaa hubi inaad had iyo jeer la socoto.

3. **Samee waxay waraaquhu kuu sheegayaan.** Waraaquhu waxay kuu sheegi doonaan waxyaabaha ay tahay inaad samayso. Xataa haddii aadan u qalmin OHP ama dheefaha kale ee Medicaid, waa muhiim inaad ka jawaabto waraaqaha gobolka. Waxay kaa caawin doonaan inaad hesho caymis kale.
    - Markaad hesho waraaqahaaga, waxaad heli kartaa caawimo bilaash ah si aad u fahamto oo aad samayso waxay kuu sheegayaan. Waxaad caawimo ku heli kartaa fool ka fool ama taleefanka. Waxaad ka heli kartaa caawimo kuu dhaw halkan **KeepCovered.Oregon.gov**.
    - Haddii aad u baahan tahay caawimo oo aad jeclaan lahayd inaanu cid kale kala hadalno OHP-gaaga ama dheefaha kale ee Medicaid, waxaad haysan kartaa xubin qoys ama saaxiib ku caawiya. Waxay noqon karaan “wakiilkaaga idman”.

## Dadka raba in laga caawiyo inay cusboonaysiistaan macluumaadkooda xiriirka:

Ma heli kartaa intarnet?

- Kaga soo sheeg isbeddalada onlayn ahaan barta **benefits.Oregon.gov**. Sidoo kale waxaad isku diiwaangalin kartaa halkaasi si aad u hesho  farriin qoraal ah  iimeyl ah ama degniinaha marka waraaqahaaga boosta la soo dhigo, markaa waad sii ogtahay inay soo socdaan. Oo marka aad hesho waraaqahaaga, halkaasi ayaad kaga jawaabi kartaa, sidoo kale.
- Booqo **KeepCovered.Oregon.gov** si aad u ogaato qaabab aad caawimo ugu heli karto fool ka fool, onlayn ama taleefan.
- Sidoo kale waxaad ka heli kartaa caawimo xafiis ama danwadaag bulsho oo kuu dhow bartan **KeepCovered.Oregon.gov**.

Ama, waxaad:

- Wacaan (833) 722-9156 maalmaha shaqada laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo Dhammaan wicitaanada dadka naafada ah waa la aqbalayaa. Waxaad caawimo ku heli kartaa luuqado badan — kaga hel lambarka taleefanka caawimo luuqaddaada ku baxaysa halkan **benefits.oregon.gov**. Waqtiyada sugitaanku waa kuwa aad u gaaban inta u dhaxaysa saacadaha 7 subaxnimo iyo 8 subaxnimo.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wax kasta ama u baahan tahay caawimo dheeraad ah, booqo K**KeepCovered.Oregon.gov**.

# Waxyaalaha la qoro iimeyl ama warside

## Cinwaanka iimeylka ama mawduuca warsidaha:

Ma haystaa OHP ama Medicaid kale? Qaad tallaabo si aad u ilaashato macaashyadaada/ dheefahaaga!

## Farriin iimeyl ama warside:

Ma haysataa OHP ama dheefo kale ee Medicaid, sida Medicare Savings Program ama adeegyada iyo taageerooyinka loogu talogalay dadka naafada ah iyo dadka da'da ah?

Cusboonaysiinta Oregon Health Plan (OHP) ayaa dib u bilaabmay iyo dheefaha kale ee Medicaid. Oregon waxay ka shaqaynaysaa inay dadka ugu badan ee suurtogalka ah ay noqdaan qaar haysta kaar caafimaad. Dadka intooda badan waxay sii wadan doonaan dheefahooda. Waxa jira ikhtiyaaro kale oo ay heli karaan dadka u baahan dheefo caafimaad. Laakiin waxaad u baahan tahay inaad tallaabo qaaddo.

Hubi in gobolka Oregon haysto cinwaanka aad hadda degantahay. Iyo marka aad waraaqaha cusboonaysiinta ka hesho gobolka Oregon, samee waxay kaa rabaan isla markaaba.

**Shayga ugu muhiimsan ee aad samayn karto waa inaad hubiso in cinwaankaagu sax yahay si markaa gobolku kuula soo xiriiri karo.** Adiga ayaa taas iskaa u samayn kara ama waxaad ka heli kartaa caawimaad bilaash ah halkan:

- Ka hel xafiis ama bahwadaag qaabbilsan arrimaha bulshada oo kuu dhow adigoo isticmaalaya barta ciwaankeedu yahay KeepCovered.Oregon.gov.
- (Danwadaagta: Haddii aad tahay kaalmeeye muctarif ah, ku beddal qodobka sare martiqaadka si caawimo laguula soo xiriiri karo.)
- Kaga soo sheeg isbeddalada onlayn barta benefits.Oregon.gov
- Wacaan (833) 722-9156 maalmaha shaqada laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo Dhammaan wicitaanada dadka naafada ah waa la aqbalayaa. Waxaad caawimo ku heli kartaa luuqado badan — kaga hel caawimo luuqaddaada ku baxaysa halkan benefits.Oregon.gov. Waqtiyada sugitaanku waa kuwa aad u gaaban inta u dhaxaysa saacadaha 7 subaxnimo iyo 8 subaxnimo.

**Inta badan boostadaada ka eeg waraaqaha ay kuusoo diraan gobolka Oregon.** Markay kusoo gaaraan, **isla markiiba samee waxyaabaha ku qoran**. Waraaqaha waxa la dirayaa hadda ilaa bartamaha 2024. Cid walba isku mar ma heli doono warqaaqaha. Had iyo jeer eeg boostadaada. Waxaad isticmaali kartaa khayraadka sare lagu taxay si aad u hesho caawimo bilaash ah si aad u fahamto waraaqahaaga una samayso waxay kuu sheegayaan.

Booqo KeepCovered.Oregon.gov si aad wax uga ogaato halka aad ka helayso caawimo bilaash ah, ama wac **1-800-699-9075** si aad u ogaato meesha aad ka heli karto caawimo.

Haddii aad u baahan tahay caawimo oo aad jeclaan lahayd inaanu cid kale kala hadalno OHP-gaaga ama dheefaha kale ee Medicaid, waxaad haysan kartaa xubin qoys ama saaxiib ku caawiya. Waxay noqon karaan "wakiilkaaga idman".

Haddii aad wax su'aalo ah qabto, fadlan noo sheeg!

# Boostiyada iyo qoraalada/sawirrada warbaahinta bulshada:

**Kani waa waxa qoraalada ah in aad ku koobiyayso oo aad dhigto barahaaga bulshada. Waxaad u isticmaali kartaa sida-ay tahay ama wax baad ka beddeli kartaa.**

**Kani waa sawirka bulsheed ee lagu talinayo in aad u isticmaasho qoraalkaaga baraha bulshada. Waxaad isal isticmaali kartaa sawir kasta iyo qoraal kasta. Guji sawirka si aad u soo degsato.**

---

Adiga ama xubin ka mid ah qoyskaagu ma haystaa qorshaha caafimaadka ee lagu magacaabo Oregon Health Plan (OHP) ama macaashyada/dheefaha kale ee Medicaid? Haddii Jawaabtaadu haa tahay, waa inaad qaado tallaabo aad ku xafidanayso(ku sii haysanayso)macaashyada/dheefaha caafimaadkaaga. Waraaqaha dib-u-cusbooneysiinta ayaa hadda la bilaabay in loo diro macaamiishadiraa waxayna socon doonaa ilaa laga gaaraayo bartamaha 2024.

Waa kuwan waxyaabaha ay tahay inaad sameyso:

Xaqiiji in cinwaankaaga aan haysano in uu yahay kan hadda. Adiga ayaa cusbooneysiin kara ama waxaad heli kartaa caawimaad bilaash ah. Waxaad tani ku samayn kartaa qaab onlaynka ah, ama telefoonka ama si shaqsi(Fool ka fool) ah.

Ka hubi boostadaada waraaqaha dib-u-cusboonaysiinta. Markay kusoo gaaraan, isla markiiba samee waxyaabaha ku qoran.

Booqo barta ciwaankeedu yahay KeepCovered.Oregon.gov si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo caawimaad bilaash ah.

#KeepCovered




---

Waxaad doonaysaa inaad daryeesho naftaada iyo qoyskaaga. Waxaad doonaysaa inaad daboosho baahiyahaaga adigoo markaa qorshaysanaaya mustaqbalka. Qorshahaaga Caafimaadka ee lagu magacaabo Oregon Health Plan (OHP) ama macaashyada/dheefaha kale ee Medicaid ayaa ku caawin kara. Isbeddel ayaa soo socda. Waraaqaha dib-u-cusbooneysiinta ayaa hadda lasoo dirayaa ilaa laga gaarayo bartamaha sannadka 2024. Qaad tallaabo si aad u xafidato macaashyada/dheefaha caafimaadkaaga!

Booqo barta ciwaankeedu yahay KeepCovered.Oregon.gov si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo caawimaad bilaash ah.

#KeepCovered



Caafimaadkaaga ayaa muhiim inoo ah. Sidaa darteed, waxaad xaqiijisaa inaad heli karto daryeel caafimaad markaad u baahato. Isbeddel ayaa ku imanaya qorshaha kaarka caafimaadka ee Oregon Health Plan (OHP) iyo macaashyada / dheefahakale ee Medicaid. Waraaqaha dib-u-cusbooneysiinta ayaa hadda lasoo dirayaa ilaa laga gaarayo bartamaha sannadka 2024. Qaad tallaabo si aad u xafidato macaashyada/ dheefahacaafimaadkaaga!

Booqo barta ciwaankeedu yahay KeepCovered.Oregon.gov si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

#KeepCovered




Isbeddel ayaa ku imanaya qorshaha kaarka caafimaadka ee lagu magacaabo Oregon Health Plan (OHP) iyo macaashyada/ dheefaha kale ee Medicaid. Waxaad Hubisaa in ciwaankaaga aan haysano uu yahay kan saxda ah si aad u hesho waraaqaha laguu soo diro ee dib-u-ccusbooneysiinta.

Booqo barta ciwaankeedu yahay KeepCovered.Oregon.gov si aad wax badan uga ogaato sidii aad ku sii haysan lahayd macaashyada/dheefaha kaarka caafimaadkaaga.

#KeepCovered



Ogaysiis ku socda xubnaha Qorshaha kaarka Caafimaadka Oregon (OHP) iyo kuwa kale ee haysta faa'iidooyinka Medicaid! Ma yahay macluumaadkaaga aan haysano ee aan kaala soo xiriiri karno midka saxda ah? Isbadal ayaa soo socda. Waraaqaha dib u cusboonaysiinta ayaa hadda ilaa laga gaaraayo bartamaha 2024-ta la soo dirayaa.

Si aad u xaqiijiso aadna u cusboonaysiiso macluumaadkaaga ciwaanka lagaala xiriirayo waxaad booqan kartaa barta ciwaankeedu yahay KeepCovered.Oregon.gov ama wac 800-699-9075. Riix lambar 5. U sheeg qofka kaa qabta wicitaanka luqadda aad doorbidayso. Waqtiyada sugitaanku waa kuwo aad u gaaban inta u dhaxaysa saacadaha 7 subaxnimo iyo 8 subaxnimoTallaabadan fudud ayaa kaa caawin karta inaad sii haysato macaashyada/dheefaha kaarka  caafimaadkaaga!

#KeepCovered









# Nuqulka websaytka, SMS/farriinta qoraalka ah iyo chatbot

## Nuqulka Websaytka

Waa waqtigii aad cusboonaysiin lahayd Oregon Health Plan (OHP-gaaga) iyo dheefaha kale ee Medicaid! Oregon waxay ka shaqaynaysaa inay dadka ugu badan ee suurtogalka ah ay noqdaan qaar haysta kaar caafimaad. Dadka intooda badan waxay sii wadan doonaan dheefahooda. Waxa jira ikhtiyaaro kale oo ay heli karaan dadka u baahan dheefo caafimaad. Laakiin waxaad u baahan tahay inaad tallaabo qaaddo.

- Hubi in cinwaankaagu sax yahay
- Marka la soco waraaqo kaaga yimaadda gobolka Oregon. Samee waxay kuu sheegayaan isla markaaba.
- Caawimo bilaash ah ayaa lagu heli karaa luuqado badan. Booqo **KeepCovered.Oregon.gov** ama wac (833) 722-9156 si aad uga ogaato wax badan una hesho caawimo kuu dhaw.

## Farriin SMS/Qoraal

- Waa waqtigii aad cusboonaysiin lahayd Oregon Health Plan (OHP-gaaga) iyo dheefaha kale ee Medicaid! Gobolka Oregon wuxuu boosta kuugu soo diri doonaa waraaqo. Hubi in ciwaankaagu sax yahay, si aad u hesho waraaqaha. Booqo **KeepCovered.Oregon.gov** si aad wax badan u ogaato ama wac (833) 722-9156.
- Ma haysataa Oregon Health Plan (OHP) ama dheefo kale ee Medicaid, sida Medicare Savings Program ama adeegyada iyo taageerooyinka loogu talogalay dadka naafada ah iyo dadka da'da ah? Hubi in gobolka Oregon kaa hayo cinwaankaaga saxda ah si laguugu soo diro waraaqahaaga cusboonaysiinta. Booqo **KeepCovered.Oregon.gov** si aad wax badan u ogaato ama wac (833) 722-9156.


## Farriinta Chatbot

Muddada aad halkan joogto… hubi cinwaankaaga gobolka Oregon kaa hayo inuu sax yahay. Sidaasi ayaad ku heli doontaa waraaqahaaga ku saabsan cusboonaysiinta Oregon Health Plan (OHP) ama dheefaha kale ee Medicaid. Waraaqaha waxa la dirayaa hadda ilaa bartamaha 2024. Haddii gobolku kaa hayo cinwaan qaldan, waad waayi kartaa dheefahaaga! Si aad wax badan u ogaato tallaabana u qaaddo, booqo **KeepCovered.Oregon.gov** ama wac (833) 722-9156.

# Xogsidaha Dhacdada

Waxaad isticmaali kartaa xogsidaha halkan ka muuqda si aad u wadaagto macluumaadka ku saabsan isdiiwaangalinta furan, saacadaha shaqada kaalmeeyaha, iyo dhacdooyinka kale ee dadku caawimo ka heli karaan.

Xogsidaha waxa la heli karaa isagoo PPT ah si aad u soo dejisan kartid una galin karto macluumaadkaaga. [Halkan guji si aad u soo dejisato].




KeepCovered.Oregon.gov

Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriisi, OHA waxay bixin kartaa macluumaad u qoran qaabab kale sida tarjumaado, daabicid-da farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir lambarka 503-945-5488 (wicitaanada dadka naafada ah waa la aqbalaa) ama feedback@odhsoha.oregon.gov.